

Waa Maxay Amarka Ilaalinta?

Amarka Ilaalinta waa amar ka soo baxo maxkamada oona suurta galinkara in uu kor uqaado nabadgalyada dadka kasoo badbaaday rabshadaha kadhaco qoyska dhexdiisa, xadgudubka galmada, iyo dabagalka. Amarada ilaalinta ayaa laga soo fulin karaa kiiska maxkamada madaniga ama qayb ka mid ah kiis dambiyeeda la xukumay qaarkood.

Amarada ilaalinta dambiyada ayaa la dajiya kaliya wakhtiga lagu gudo jiro kiiska dambiyada waxayna u dhamaan karaan si kadis ah adigoo digniin lagu siin. Sidoo kale waxaad raadsan kartaa inaad hesho amarka ilaalinta ka soo fulo maxkamada madaniga haddii xiligaas ay jirto kiis dambi iyo inkale ba. Amarada Ilaalinta Madaniga waxay socon karaan ilaa shan sano waana la cusbooneysiin karaa. Haddii ay jirto kiis dembi ah oo wali la sugayo, waxaad la-hadashaa qareen ka hor inta aadan soo buuxsanin amarka ilaalinta madaniga sababtoo ah buuxsashada madaniga waxay kaa dhigi kartaa ama aad heli waydaa difaac la'aan taana waxay saameyn ku yeelan kartaa kiiska dembiga oo lasugayo.

Waxaa jira dhowr nooc oo ah amarrada ilaalinta ka yimaada madaniga oo aad heli karto nooca lagu fidindoono oo ku xidhan xiriirka aad la leedahay qofka aad uga baahan tahay in lagaa badbaadsho iyo nooca rabshadeedka markaas taagan ama hore udhacay. Wixi macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan noocyada amarada badbaadinta ee la heli karo, noocee (yadee) ayaa uqalmi kartaa, iyo gargaarka ay bixin karaan, booqo boga interneedka www.odvn.org/survivor/law.html.

Amarka Bad-baadinta Miyuu Igu Haboonyahay?

Inta badan waxaa qatarta ama dhibaata kugu kordhiyo marka aad ku fikirto ama ku dhaqaaqdo in aad soo afjarto xariirka idiin dhaxeeya adiga iyo qofka kugu hayo xadgudubka. Amarada Bad-baadinta waa laga yaabaa inay sugaan nabadgalyadaada lakiin ma kuu fidinkaraan dammaanad qaad buuxda aad ku hesho amni. Buuxita aad buuxsato Amarka badbaadinta ayaa kuu keeni kara dhibaatooyin kale adiga ahaan, qaasatan hadii aad: leedahay caruur, leedahay dhibaatooyinkaloo la xariira sharciga, ama kiis adag ku hor istaaga sababba kale awgood. Wixikaloo macluumaad dheeri ah kuna saabsan dhibka ka imaan kara marka la codsado Amarka Badbaadinta, booqo boga intarneedka <http://www.odvn.org/survivor/law.html> iyo buuxi oo dhameystir foomka "Marka Hore Ma Ubaahanay Qareen?".

Waa muhiim inaad qorsheesato hab kuu gaar ah aad nabadgalyadaad ku sugto adigoo lakaashanaya qorshahaas udoodaha qaabilsan rabshadaha guriga. Barnaamijka kuugu dhawo kugu hagi doonaa qorshahaas waxaa ka helikartaa adigoo wacaaya **800-934-9840**. Xatee waxaa kaloo la hadli kartaa udoohada qaabilsan rabshadaha ka dhexdhaco guriga si aad ooga wareesato inay kugu haboontahay ama ay go'aan saxsan tahay inaad buuxsato Amarka Badbaadinta. Inaad raadsato ama buuxsato Amarka Badbaadinta ka hor adigoo sameysan qorsho amni aana latashan qolada sharciga waxaa laga yabaa in aadan helin nabadgalyo sugan oo laga sii yabaa inaad qatarta kugu sii badato.

odvn.org | **800-934-9840**

Sida Loo Helo Caawinaad Dhanka Sharciga

Xaaladaha badankood, gaar ahaan haddii aad caruur, ama hanti ama deyn ay idinka dhaxeeyo adiga iyo qofka kugu xadgudbay, runtii waxaa muhiim ah inaad hesho qareen kahor inta aadan buuxinin amarka badbaadinta maxkamada. Waa kuwan qaar ka mid ah siyaabaha aad ku helikarto qareen iyo macluumaad kaloo ku saabsan sharciga:

- **Xafiisyada Gargaarka Sharciga:** Wac **866-lawohio (866-529-6446)** ama booqo: www.ohiolegalhelp.org si aad u hesho xafiiska gargaarka sharciga ee jaaliyadaada. Waxaa laga yaabaa inay kuu fidiyaan qareen bilaash ah oon wax lacak ah ku weydiisanin.
- **Barnaamijka Rabshadaha Guriga:** Waxaa jira barnaamijyo loogu talagalay dadka kasoo badbaaday dhibaatooyin ee u baahan amarada ilaalinta, barnaamijyadaas oo laga yaabaa inay ku siiyaan adeegyo sharci oo bilaash ah iyada oon lagu fiirineynin dakhligaaga. U-doodaha kuugu dhaw ayeetahay inuu awoodi karo si uu kaaga caawiyo oona kuugu hago barnaamijyadaan iyo Barnaamijka Magdhowga Dhibanaha Dambiga.
- **Qareenka Tabaruca/Pro Bono:** Jaaliyadaha qaarkood waxay haystaan qareeno tabaruc ah. Haddii u-doodahaga uu kugu hagiwaayo qareen lagu kalsoonyahay, waxaad la xariiri kartaa ururka qareenka deegaankaaga si aad u ogaato in qareenada tabaruco ay awoodaan inay ku caawin karaan. Haddii iskuulka sharciga udhowyahay deegaankaaga, soo eeg haday haystaan caawinaad sharci oo bilaash ah oo loo marayo rugta sharciga.

Qareen kaliya ayaa ku siin kara talada sharciga ama kaa caawin kara inaad kiiskaaga maxkamada hor dhigto. U-doodaha wuxuu kaa caawin karaa inaad dhisto qorsho nabadgelyeed oo kuu gaar ah, kaasoo qayb muhiim ka ah tallaabo kasta oo sharci ah oo aad qaado.

WAA MAXAY AMARKA ILAALINTA?



The Ohio Domestic Violence Network (ODVN) is a statewide coalition of domestic violence programs, supportive agencies, and concerned individuals working together to stop domestic violence through education, information and training for those who are affected by domestic violence, and by promoting social and systems change.

This project is supported by Grant No. G-1901OHSVDC awarded by the Department of Health & Human Services, Administration for Children and Families (ACF), Administration on Children, Youth, and Families (ACYF), Family and Youth Services Bureau (FYSB). The opinions, findings, conclusions, and recommendations expressed in this publication, program, exhibition are those of the author and do not necessarily reflect the views of the Department of Health & Human Services.

odvn.org | **800-934-9840**

SOMALI CPO BROCHURE



Side Baan Ku Raadsankaraa Amarka Badbaadinta?

Dagmooyinka wey ku kala duwan yihiin nidaamka. Laxariir barnaamijka rabshadaha guriga ee kuugu dhaw si aad ooga warhesho qaabka hawsha loomaro deegaankaaga. Waxay kaloo kaa caawin karaan buuxinta codsiga amarka badbaadinta ama waxay kaloo kaa caawin karaan inaad hesho qareen. Qasab ma ahan inaad qareen hesho si aad u buuxsato amarka badbaadinta, lakiin nidaamka loo buuxsado ayaa noqonkara hawl kugu adkaata waxaa markasta wanaagsan inaad heesato qareen. Waxaa si gaar muhiim u ah inaad la hadasho qareen ka hor inta aadan ku dhaqaaqin buuxinta amarka badbaadinta hadii aad caruur kaala dhaxeeyso qofka kugu xadgudbay aad kaga baahantahay badbaadinta amaba aad leedahay dhibaatooyinkale xaga sharciga. Waxaa suurta gal ah inaad xarunta caawinta sharciga deegaangaaga, Barnaamijka Magdhawga Dhibanaha Dambiga, ama barnaamij kale bilaash ah ka hesho qareen aan wax lacak kugu dalacin ama qarash kaaga bixin. Warqada lagu buuxsado waxaad ka helikartaa xafiiska maxkamada ee deegaanka aad ka buuxsaneyso badbaadinta. Waxaa kaloo isla warqadaahaas ka soo dajisan kartaa boga intarneedka Maxkamada Sare Ohio (www.supremecourt.ohio.gov/JCS/domesticViolence/default.asp). Haddii aad isticmaaleysa bogaga intarneetka ah aad ka dhameysan rabto hawshaada ku saabsan amarka badbaadinta marka hore hubso inaad isticmaasho kumbuyuutar qofka kuguxad-gudbay uusan kula isticmaali karin, sida maktabadda ama kumbuyuutarka saaxiibka aad ku kalsoon tahay.

Side buu Nidaamka Maxkamada U-shaqeeyaa?

Tilaabada 1: Buuxin—Dhibanaha ama qareenka matalaya ayaa buuxiya ama xareya codsiga Amarka Badbaadinta. Haddii aad ubaahantahay badbaadin deg-deg ah, waa in codsigaaga Amarka Badbaadinta kujira codsi kaloo aad maxkamada weydiisaneyso in qeeybtaas dageysiga maxkamada lagu hordhaqaaqo.

Tilaabada 2: Qeyb-ahaan Dhageysiga Maxkamada— Maxkamada waxay qabataa dhageysiga qeyb-hore (macnaheedu yahay hal xisbi kaliya ayaa jooga) gudaha waqtiga loogu talagalay qaynuunka. Si aad u-hesho 'CPO', oo ah isla maalinta aad buuxsato lagu hergaliyo codsashada ka ilaalinta. Dawagalka iyo/ama xad-gudub galmo laga badbaado ama Amarka Badbaadinta Caruurta, sidoo kale la hergaliyo isla maalinkaas ama maalinta maxkamada ee xigta buuxinta codsiga. Arintan waa fursaddaada aad ugu sheegi karto garsooraha sababta aad ugu baahan tahay amar badbaado deg-deg ah garsooraha ayaa go'aaminaya inuu soo saaro amarka iyo in kale maalintaas.

Tilaabada 3: Gudoonsiin Waraaqadaha Sharciyeedka— Eedeysnaha (qofka aad kaga baahantahay in lagaa ilaalsho) waxaa la'gudoonsiyaa waraaqado ka turjumaya codsigaagi maxkamadeed ooh aa Amarka Ilaalinta (waa hadii Amarka Ilaalinta ka soo fulay maxkamada ka hor maalinka dhageysiga maxkamada) iyo waxaa kaloo la ogaysiyaa dhicitaanka dhagaysiga maxkamada oo dhamaystiran. Waqtigan wuxuu noqon karaa waqti aad u khatar badan qorshahaaga ilaalintana waa inuu wax ka qabtaa nabadgalayada sida saaidka aad ugubaahantahay inta lagu jiro waqtigan.

Tilaabada 4: Dhageysiga Maxkamada Buuxa— Maxkamada waxay qabataa dhageysi buuxa ay go'aamadeeda ku gaarto badanaa 7-10 maalmood, waa qasab inaad ka soo qeebgasho. Waxaa dhici kara mid kastoo ka mid ah waxyaabaha soo socda: dhageysiga maxkamada waxaa loo sii gudbin karaa taariikh kale, adiga iyo eedeysnaha waxaad gaari kartaan heshiis amni ilaalin oo loo yaqaan Heshiiska Ogolaashaha, ama waxaad yeelan kartaa dhageysiga maxkamada ay kiis ka dhageysato. **Waxaad u baahan tahay inaad diyaar u ahaato si aad hore ugu sii wajahdo**

dhageysiga maxkamada maalin kasta oo dhageysiga la qawanayo oo keento markhaatiyaashaada, caddeymahaga, iyo wax kasta oo ku saabsan waxyaabaha aad ku soo darsatay codsigaaga. **Maxkamaddu waxay ogolaankartaa in macluumaad kale loo soo bandhigi karo ku saabsan boogashada caruurta, isticmaalka daroogada, xaalad nololeedka iyo wixi kaloo la mid ah.**

Tilaabada 5: Amarrada Maxkamada— Waxaa laga yabaa in Maxkamada soo saarto amarkeeda isla wakhtiga dhageysiga maxkamada socdo ama ay sugto si ay amarkeeda kuugu soo dirto guriga aad kala soo baxdo boostada. Amarrada maxkamada ayaa noqon kara kuwo awood leh-oo ka kooban halka uusan eedeysnaha soo dhafi karin, cidda haynaysa mas'uuliyada caruurta, yaa ku noo laan kara guriga, iyo hadii eedeysnaha loo ogolyahay in uu hub ama qori sharciyeesankaro. Waxaa kaloo laga yaabaa in maxkamada aysan ku siin Amarka Badbaadada oo taana aad kuugu adkeysa inaad nabadgelyo hesho mustaqbalka.

Marwaliba hayso qoraalka amarka badbaadada maxkamada ku siisay si aad u tusin karto askarta hadii ay dhacdo in la dhaqan galsho amarkaas. La wadaag dadka kale aad isleedahay wey meel marin karaan hadii loo baahdo sida iskuulka ilmahaaga ama meesha aad ka shaqeeysid.

Isu Diyaarinta Maxkamada Kahor Dhageysigaaga

- Baro sida loo tago goobta maxkamada iyo meesha gaariga la dhigto (haddii loo baahdo). Ku talagal si aad ugu dhaqsato dhageysi maxkamadeed kasta.
- Nadaafad iyo muuqaal wanaagsan waa muhiim maxkamada dhexdeeda.
- Hore ula sii tasho udoodahaga iyo qareenkaaga meesha aad kusugi karto si aad ooga dheeraato in eedeysnaha kula xiriir kador, ama kudaha, ama kadib maxkamada, caawinaad ka raadso shaqaalaha maxkamada hadii eedeysnaha isku dayo xiriir aadan raali ka ahayn, ama aad ubaahantay in lagu sogootiyo lagu wehliyo.
- Hadeysan caruurta marqaati ka noqoonoonin maxkamada, ma wanaagsana inaad caruurta usoo kaxeeso maxkamada. Sii qorsheeso meel caruurta laguugu hayo inta aadan ka warhelin waqtiga dhageysiga maxkamada adigoo og in dhageysiga qaadan karo xili gaaban ama uu qaadan karo maalinta inteeda badan. Usheeg udoodaha ku qaabilsan hadii aadan haysan meel caruurta laguugu hayo.
- Ku noqo oo aqoon u yeelo waxaad buuxisay iyo cadeemahaga kador xili kasta oo aad maxkamada balan ku leedahay. Hubso in marqaatigaaga la heli karo oo sii codsiga maxkamada marqaatiga ku codsato hadii loo baahdo.
- Waxaad xaq uleedahay in qofka kuu doodo uu kula gali karo qofka maxkamada markasta aad maxkamada balan ka leedahay.
- Waxaad xaq uleedahay in maxkamada kuu diyaaris turjumaan hadii aadan ku hadlin afaka ingriiska ama aad dhagooltahy ama aadan si fiican wax u maqli karin. Usheeg qof ka kuu dooda iyo maxkamada hadii aad u baahantahay turjumaan xiliga aad buuxsaneyso codsiga maxkamada ama markasta oo maxkamada balan ku leedahay. Mar walba waxaa wanaagsan inaad haysato qareen marka dhageysiyada maxkamada.

Qish kusaabsan Marqti Furka

- Ku dhag xaqiiqda oo ka jawaab celi su'aasha lagu weydiinayo kaliya. Haddii aad u baahan tahay inaad bixiso macluumaad dheeraad, waxaa kula haboon inaad sugto waqtigaaga mar labaad si aad u hadasho.
- Kor u hadal oona fasiix ah si garsooraha iyo wariyaha maxkamada ay kuu maqqaan.
- Ka fogow isticmaalka erey kasta, sida ereyada shuruudaha sharciga ama caafimaadka, haddii aadan aqoonin macnahooda.
- Waqtigaaga qaado markaad ka jawaabeysu su'aalaha. Haddii aadan fahmin su'aal ama aadan garaneyn jawaabta, qiro. Haka jawaabin su'aal kasta ilaa aad si buuxda ufantid waxa lagu weydiinayo.
- Ka dhax Muuji daacadnimo kudaha maxkamada oo had iyo jeer ula hadal garsooraha si ku dheehan maamuusid dheh "Sharafsan."
- Eedeysnaha ama qareenka eedeysanah ayaa laga yaabaa inay kugu dhahaan wax kaa careesiya amaba isku dayaan inay kaa xanaajiyaan. Marna ha u-jaleecin xoogana saar inaad isdajiso. Garsooraha weydiiso hadii aad ubaahato waqti hakad ama nasasho gaaban.

Maxaa Dhacaya Haddii lagu Xadkudbo Amarkayga Badbaadinta?

Amarkaaga Ilaalinta waa laga dhaqan galin karaa meel kastoo ka mid ah kudaha Maraykanka. Haddii la jabiyo Amarkaaga Ilaalinta, la hadal udoodahaga si dib loogu qorsheeyo nabadgalyadada. Waxaa kaloo samayn kartaa:

- Uruuri oo keydso cadayma kasto. Taas oo ka mid noqon karto inaa sawirro ka qaado xadgudbaha, gaarigooda, ama waxyeelaha loogeystay hantidaada, ama keydinta qoraalka ama fariimaha taleefoonka, bandhiga baraha bulshada ama boostada.
- U wac askarta oo weydiiso si ay kuugu dhaqan galiyaan Amarkaaga Ilaalinta (ayagoo xeraya xadgudbaha). Jabinta Amarka Badbaadinta ayaa noqonkarta fal dambiyeed la geysta. Haddii aad waceyso askarta, u wac sida ugu dhaqsiiyaha badan ay kuugu suurto gasho inta lagu guda jira ama kadib xadgudubka. Haddii aysan wax xerig ah askarta ku dhaqaaqin, weydiiso inay warbixin qaadaan.
- Kala hadal xeer ilaaliyaha meesha Amargaadi Badbaadinta looga xadgudbay si aad u xareyso dambi oogis.
- Buuxi mooshin ka dhan ah eedeysnaha si maxkamada u ogaato in uusan ixtiraamin maxkamadi hore usoo saartay Amarka Badbaadinta.